

**X. M. J. ee 30 Setembere 1961, lamba. 254**

**Dhisidda Xafiis Qaalli.**

### **MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA**

Markuu arkay qodobka 96, ee Dastuurka;

Markuu arkay qodobka 81, ee Nidaamka Garsoorka oo lagu ansixiyey (oggolaaday) Amargooyo 2<sup>da</sup> febraayo 1956, lamba. 5;

Markuu garwaaqsaday baahida loo qabo in xafiis cusub, ee qaalli, laga dhiso bartamaha Badhaahda;

Markuu dhegeystay Golaha Sare, ee Garsoorka oo bixiyey talo (Ráyi) lamba. 19, ee taariikh 19 Maajo 1961;

### **WUXUU XEERINAYAA**

Laga bilaabo waqtiga ugu dhaqsiiyaha badab, waxaa xafiis cusub, ee qaalli (qaadi) laga dhisayaa bartamaha Badhaadha, oo ka tirsan degmada Kismaayo, oo awood garsoor ku leh dhulka ku gudajira xuduudda ah, waqooyi khadka xadka Gooba, xagga galbeed iyo koofur-galbeed waxaa ka xiga xadka Keenya, Xagga koonfur-barina Badweynta Hindiya.

Muqdisho, 30<sup>ka</sup> Setembere 1961.

**Adan Cabdulle Cusmaan**

Wasiirka Arrimaha Diinta iyo Caddaaladda

**Maxamuud Axmed Maxamed Caddaan**

Waa arkay waana Diiwaangeliyey

– Diiw. lamba. 8, xaashi lamba. 249.

Muqdisho, 8<sup>da</sup> Oktoober 1961.

Hanti-dhowraha: **Cali Axmed Cumar**